



XEERKA HAB-DHAQANKA ANSHAXA URURRADA SIYAASADDA PUNTLAND

Tixraac:

Taariikh:

I. AARAAR

Lixda urur siyaasadeed ee Puntland:

- Iyagoo ogsoon muhiimadda habraaca diiwaangelinta ururradda siyaasadda uu u leeyahay hanaanka dimoqraadiyeynta Puntland;
- Iyagoo ogsoon in Guddiga Doorashooyinka Puntland ee KMG u xilsaaran yahay diiwangelinta Ururrada Siyaasadda Puntland;

Waxa ay ku heshiiyeen in ay u hogaansamaan Xeerkan Hab-dhaqan kaas oo ay wada saxeexeen Ururrada Siyaasadda diiwaan gashan iyo GDP ee KMG maanta oo ay taariikhdu tahay 31st Jan, 2013.

II. MABAADIIDA GUUD:

Urur kastaa wuxuu ballan qaadayaa:-

1. Inuu muujiyo inuu u hoggaansan yahay ku dhaqanka Xeerkan;
2. Inuu ku wacyi-geliyo taageerayaashooda, Wakiillada Ururrada, Xubnaha Ururka iyo Madaxdaba in ay ku dhaqmaan islamarkaana ixtiraamaan meel-marinta iyo ku dhaqanka Xeerkan;
3. Inuu adkeeyo joogteeyanna wada shaqaynta kala dhaxaysa Guddiga Doorashooyinka;
4. Inuu ka qaato tallaabo adag oo ka-hortag u ah in lagu xad-gudbo Xeerkan;
5. In la ixtiraamo lana dhawro Xuquuqda Aadamiga;
6. Inuu maamuuso, qaddariyo, ixtiraamana xuquuqda iyo xorriyadda Ururrada kale inay abaabullan taageerayaashooda; inay faafiyaan aragtidooda siyaasadeed iyo mabaadii'dooda si aan gabbasho ku jirin;
7. Inuu dhawro xuquuqda iyo xorriyadda Ururrada kale inay si sharciga waafaqsan u dhejiyaan hal-ku-dhegyo, boodhadh, calaamadaha Ururradooda iwm;
8. Inuu muujiyo hab-dhaqan tixgelinaya xuquuqda Ururrada, xuquuqda taageerayaasha iyo bulshada inteeda kale;
9. Xubnaha Ururrada Siyaasadda, Wakiillada Ururrada iyo taageerayaashoodaba waxaa ka reebban kana mamnuuc ah in ay noocyada hubabka kala duwan u soo

qaataan meelaha dadweynuhu isugu soo baxo (**Public Gatherings**), shirarka, goobaha ay ka socoto diiwaan-gelinta taagerayaasha, iyo goob kasta oo uu ka socdo olole is abaabul Urur kale.

III. Muddada Diiwaangelinta:

1. Diiwaangelinta codeeyeyaasha taageeraya urruradda Siyaasada waxay bilaameysaa **5 February, 2013** waxayna ku eg tahay **9 February, 2013**. Diiwaangelintu waxay ka dhaceysaa xafiisyadda urruradda siyaasadda ee goobaha ay soo sheegteen.
2. Urrur kasta waxa uu masuul ka yahay inuu ogaado/hubiyo inay joogaan coddeeyeyaashii taageersanaa xafiisyadooda laga diiwaan gelinayo. Urruradda waxay keensaan karaan in ka badan 3dii boqol oo taageere (ugu badnaan 330) waxaana laga rabaa iney maalin kasta keenaan turradda taageereyeyaashii loo diiwaan gelin lahaa oo buuxda si aysan u dhicin Diiwaan gelin degdeg iyo boobsiis ah daqiiqadaha u dambeeya diiwaan gelinta (last minute rush). Lama Diiwaan gelin doono wixii ka dambeeya lixda **galabnimo (6:00 pm)** ee **9 February, 2013**.
3. Maalin kasta diiwaan gelintu waxay bilaabmi **lixa arooryo (6:00 AM)** waxayna dhamaan **lixda galabnimo (6:00 PM)**.
4. GDP ee KMG waxay sameyn doonaan una sheegi doonaan urruradda siyaasadda jadwal xusaya maalmaha diiwaan gelinta taageeryaashooda iyo maalmaha guddigu ka hubin doono taageerayaashooda gobol kasta.
5. Urrur kasta waxa laga rabaa ugu badnaan labo wakiil oo u jooga goob kasta oo u hubinaya diiwaangelinta taageeryaashooda una saxeexa foomka aqoonsiga ama caddeynta taageeraha/coddeeyaha. Magacyadda wakiilada waa in loo soo gudbiyo GDP ee KMG ugu dambeyn **30 January, 2013**. Wakiil kasta waa inuu heystaa warqad uu soo saxeexey guddoomiyaha urrurka oo cadeyneysa inuu xubin ka yahay urrurka una xilsaaran yahay goob joogidda diiwaan gelinta iyo hubinta coddeeyeyaasha taageersan urrurka.
6. Urruraddu waxay keeni karaan in ka badan sadexdii boqol (300) ee sharciga ahaa oo loo diiwaan geliyo gobolkasta (ugu badnaan 330). Guddiga Doorashooyinku markay ka hubiyaan 300 oo taageere oo saxiixan, way joojin hubinta taageereyaasha.



7. Marka la diiwaan geliyo, coddeeye/taageere kasta wuxuu saxeexayaa labo nuqul oo ah aqoonsiga taageeraha aqoonsigaas oo wakiilka urrurkuna la saxeexayo. Hal nuqul waxaa la siin wakiilka urrurka nuqulka kalena waxaa leh GDP ee KMG.
8. Urrur kasta wuxuu masuul ka yahay inuu u qeybiyo foomamka aqoonsiga taageerayaashiisa ka hor ama maalinta laga hubinayo taageereyaasha.
9. Urrur kasta wuxuu masuul ka yahay hab-dhaqanka taageereyaashooda marka ay socoto diiwaan gelinta taageereyaasha.
10. Urrur kasta waxa uu ka masuul yaahya ku dhaqanka xeerka diiwaan-gelinta iyo dastuurka Puntland waana inuu hubiyo inay taageerayaasha uu u soo gudbinayo Guddiga ay yihiin muwaadiin Puntlandi ah oo gaaray da'da codeynta oo ah 18 jir.

IV. Muddada kala Saaridda/Hubinta:

11. Billowga Hubinta coddeeyeyaasha taageereya ururradda siyaasada waa maalinta taariikhdu tahay **19 February, 2013** waxayna ku eg tahay **27 February, 2013**. Goobaha hubintu waa xafiisyadda urruradda siyaasadda ee horey looga Diiwaangeliyey taageerayaashooda.
12. Urrur kasta waa inuu keeno 3dii boqol ee coddeeye ee taageersanaa urrurka oo wata foomkii aqoonsiga Coddeeyaha xafiiskooda/goobta hubinta **toddobadda iyo barka Subaxnimo (7:30 am)**. Coddeeyaha aan wadan foomka Aqoonsiga Coddeeyaha maalintaas lama aqbali doono inu ka qeyb galo tirada coddeeyeyaasha laga hubinayo urrurka.
13. Urrur kasta wuxuu keenayaa ugu badnaan labo wakiil oo goob joogeyaal uga ah goobta hubinta taageereyaashooda.
14. Urrur kasta waxa uu masuul ka yahay habeynta safka taageereyaashooda (hal saf oo lab ah iyo mid dhedig ah) iyo in taageereyaashoodu tixgeliyaan kala dambeynta safka. Hal qof ayaa markiiba u gudbi doona qolka ama miiska hubinta.
15. Marka ay dhamaato hubinta taageereyaasha gobol kasta, GDP ee KMG wuxuu siinayaa urrur kasta qoraal caddeynaya tirradda taageereyaasha laga hubiyey.
a) Xafiisyadda gobolladda
16. Urrur kasta waa inuu ku leeyahay xafiisyo/laamo hawlgal ah ugu yaraan shan (5) Gobol oo ka mid ah sideeda (8) Gobol ee Puntland.
17. Si loogu aqoonsado xafiis shaqeynaya/hawlgaley, Laan ama xafiis kasta waa inuu ka kooban yahay ugu yaraan labo qol.






18. Urur kasta waa inuu ugu keeno muddada hubinta **(19 to 27 February)** GDP ee KMG caddeymaha soo socda:

- a. Heshiiska kirada gurriiga oo saxeexan ama mulkiyadda guriga hadii urrurku leeyay.
- b. Caddeyan iijaarka kirada guriga lagu bixiyey ugu yaraan hal bil.
- c. Laga helo qalabkii shaqada ee lagu yaqaaney xafiisyada.
- d. Tabeelihii urrurka oo ka muuqda wajiga hore ee xafiiska.

b) Shirweynaha:

19. Habsami u socodka Shirweynaha waa in laga duubo caddeyn maqal iyo muuqaal ah oo muujinaysa qabashada shirweynaha. Caddeynta maqal iyo muuqaal waxaa loogu soo gudbinayaa guddiga CD and Flash disc kaas oo muujnaya furitaanka shirka, qeybo ka mida ah siduu u socdey, qaabkii loo doortay xubanaha golaha dhexe ee Ururka iyo xiritaanka shirka.
20. Urruraddu ka hor inta shirweynaha aysan qabsan, waa iney u soo gudbiyaan Guddiga Doorashooyinka goorta iyo goobta ay ku qabanayaan shirweynahooda
21. Liiska xubnaha gollaha dhexe ee urrurka waa in laga soo doortey shirweynaha uuna saxiixey Guddoomiyaha Urrurka kana muuqato shaabada urrurka waa in urrurku u soo gudbiyo Guddiga Doorashooyinka ugudambeyn 18th Feb 2013.
22. Guddiga Doorashooyinka ayaa siinaya urrurada foomka ay ugu talogaleen in loogu soo gudbiyo liiska magacyadda xubnaha goleyaasha dhexe.
23. Guddiga ayaa si wada jir ah u daawanaya una dhageysanaya CDga ama flash maqal iyo muuqaal ee laga soo duubey shirweynaha urrurka oo hubinaya inay buuxiyeen shurruudaha shirweynaha urrurada ee kor ku xusan:



SAXIIXA URURRADDA IYO GDP EE KMG

WAXAA LAGU SAXIIXAY GAROWE, MAANTA OO AH 31st January, 2013

HORCAD Political Association

Mudane: Ah Diliye Noor
Title: AAS AASE, Guddoomiye Kuxiiga Noor

HORSEED Political Association

Mudane: Abdirahman Mohamed Mohamed
Title: Guddoomiye Tuulw

MIDNIMO Political Association

Mudane: Axmed Siid Nuuse
Title: Xiriyahe gurke midnimo

PDP Political Association

Mudane: Abdirahman Mansoor
Title: Chairman A.S.

UDAD Political Association

Mudane: Siid Farax
Title: Guddoomiye



WADAIR Political Association

Mudane: Ahmed Ibrahim Awale
Title: Xiriyahe Guud.

TRANSITIONAL PUNTLAND ELECTORAL COMMISSION (TPEC)

Mudane: Mohamed Hassan Barre
Guddoomiye: [Signature]

[Signature]

[Signature]